


## Tuubada caloosha la geliyo ee quudinta (Percutaneous Endoscopic Gastrostomy) (PEG)

### Hagitaanka Tixraac oo Fudud (PEG Quick Reference)

Badelida tuubada  
caloosha la geliyo  
ee bukaanka lagu  
quudiyo



#### Qaybaha tuubada PEG

- Bambarka banaanka: gabal wareeg ah oo ka soo horjeeda banaanka caloosha.
- Bambarka gudaha: daboolka jilicsan oo tuubada caloosha ku haysa.
- Badhanka laga xiro tuubada: waxaa loo adeegsadaa in lagu xiro tuubada loogana hortago in dib usoo noqdaan walxaha marka aan la isticmaaleyn.
- Xajiyaha, godka, ama godka Y: qaybta tuubada ee loo adeegsado dheecaanka, quudinta, iyo daawooyinka.

#### Dayactir joogto ah iyo isticmaal

- Gudaha bambarka banaanka ku nadiifi saabuun khafiif ah iyo biyo maalin walba. Qalaji guud ahaan kadib. Iskuday inaad meesha qalajiso intii suurtagal ah.
- Haddii maqaarku cuncuno gaar ahaan meesha ka hooseysa bambarka, fadlan u sheeg dhakhtarkaaga.
- Ha saarin suuf ama waxyaabo kale inta u dhaxeysa bambarka banaanka iyo maqaarka. Arintaan waxay sababi kartaa bambarka gudaha in lagu riixo gidaarka caloosha waxayna u horseedi kartaa "In bambarku aasmo." Tani waa marka bambarku waxyeleeyo gidaarka caloosha uuna u baahdo in tuubada laga saaro.
- Tuubada waa in lagu dhaqo qiyaas ahaan biyo 20 mL ah labo jeer maalintii marka aan la isticmaaleyn.
- Tuubada waa in lagu dhaqo biyo kahor iyo kadib daawada iyo quudin kasta.
- Xaqiiji inaad burburiso daawooyinka lagu qaato tuubada haddii aysan ahayn dareere. Daawooyinka waa inuu eego dhakhtarkaaga si aad u aragto inay si badqab ah u burburi karaan.
- Ha isticmaalin walxaha acidic-ka ah si aad u nadiifiso tuubada, sababtoo ah waxay sababi kartaa nabaad guurka iyo burburka tuubada.

## Xog Muhiim ah oo Kale

- Marka la geliyo tuubada PEG gudaha, waa inay gudaha kusii jirtaa muddo ugu yaraan 6 asbuuc ah. Arintaan waxay u oggolaaneysaa u hoggaansanaanta caloosha ee gidaarka caloosha.
- Su'aalaha khuseeya quudinta dheeraadka ah, qaadashada kaloriga, iyo qaadashada biyaha bilaashka ah waxay u baahan yihiin in lagu hago dhakhtarka cuntada ama dhakhtarka daryeelka aasaasiga ah.
- Su'aalaha kale ee ku saabsan tuubada PEG waxaa lagu hagi karaa Xarunta Dheefshiidka.

## Bixinta tuubada PEG

- Bixinta tuubada PEG waxaa sida caadiga ah lagu sameeyaa goobta caafimaadka marka dhakhtarka koowaad uu ogolaado saarista tuubada. Waxaa caadiyan la gaaraa go'aan wada jir ah oo u dhaxeeya dhakhtarka, cunto yaqaanka, iyo bukaanka.
- Haddii bixinta tuubada aan ula kac ahayn ay ka dhacdo guriga, bukaanku wuxuu u baahan yahay in la arko sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah maadaama hoolka tuubadu si dhaqso ah u xirmaayo. Rugta caafimaadka waxay u baahan tahay in loogu waco waxana loo baahan yahay balan xafiis.
- Inta lagu jiro saacadaha kuwa rugta caafimaadka ka baxsan, bukaanku wuxuu u baahan yahay inuu aado qaybta ER si tuubo kumeel gaar ah loogu geliyo.

### Tixraacyada

Tuubada caloosha la geliyo ee quudinta (Percutaneous Endoscopic Gastrostomy, PEG) - Cleveland Clinic waxay fahansan tahay Tuubada caloosha la geliyo (PEG) – Ururka Mareykanka ee Tuubada Caloosha la geliyo (American Society of Gastrointestinal Endoscopy, ASGE)